

Amarka lamba. 19 rep.

Wax ka beddelka Qodobka 1aad ee Xeer Lr. 54 ee 14 Ogosto 1950 ee difaaca xafiiska kiisaska dembiyada.

MAAMULAHA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHA

Markuu arkay dekeretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya 31 Maarso 1950;
Markuu arkay amarka lamba. 7 ee 22 Abril 1950 ee ku saabsan midaynta iyo habaynta xeerarka ku-meelgarka ee xeerarka ka jira Dalka Soomaaliya;

Markuu arkay amarka lamba. 54 ee 14 Agoosto 1950 oo ku saabsan diffaaca xaafiis ahaaneed ee dacwadahaha ciqaabta,

Markuu garowsaday, iyadoo la tixgalinayo kor u kaca ku yimid tirada dacwadaha ciqaabta ay Maxkamadda Gobolka Banaadir qaaddo, taasoo keeni karta baahida loo qabo in cid loo xilsaaro diffaaca eedaysanayaasha, xitaa dad aan ku qornayn diwwanada qareenada iyo xeer ilaaliyeyaasha ama loo oggolaado diffaaca Maxkamadda degmada horteeda, taaso marka, loo bahanyahay in wax laga baddalo qod. 1 ee amarka la soo sheegay ee lamba. 54;

Marka uu dhagaystay talada Golaha Dalka;

WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA

Iyadoo wax laga baddalayo waxyaabaha ku qoran amarka lamba. 54 ee 14 Agoosto 1950 ayaa arrimaha lagu sheegay qod. 2 ee isla amarkaas waxaa xitaa lagu dabbaqayaa dacwadaha horyaalla Maxkamadda Gobolka Banaadir.

Muqdisho, 25 Oktobar 1951.

Maamulaha